

Sidee lagu heli karaa adeeggan

Si aad u hesho farmashiyaha kuugu dhow ee bixiya adeeggan, iskaan-garee QR koodhka ama [ka hel faahfaahin dheeri ah halkan.](#)



Fadlan la imaaw nooc aqoonsi ah iyo caddeyn muujinaysa inaad ka bixi karto shuruudaha ku xusan warqaddan.

Haddii aadan hubin, kooxda farmashiyaha ee deegaankaaga ayaa ku caawin karta.



Ma u baahan tahay taageero caafimaad ama talo?



Farmashi

Kooxda farmashiyaha ee deegaankaaga ayaa ku siin kara talo iyo daaweyn ay khibrad u leeyihiin iyada oo aan loo baahnayn warqad dhakhtar ama ballan.

Ballamaha Dhakhtarka Guud (GP) ee fiidkii iyo dhammaadka usbuuca

Ka raadi intarneetka xarumaha Dhakhtarka Guud (GP) ee degmadaada.

NHS 111

Haddii aad u baahan tahay gargaar caafimaad oo degdeg ah, wac 111 ama booqo 111 online. Waa adeeg bilaash ah oo furan 24 saac, 7 maalmood usbuucii.

Caafimaadka dhimirka

Haddii aad u baahan tahay gargaar degdeg ah, wac **111** ama booqo **111 online** oo dooro qaybta caafimaadka dhimirka.

NHS.uk

Booqo www.nhs.uk si aad u hesho macluumaad si fudud loo fahmi karo oo ku saabsan xaalado caafimaad oo kala duwan.

Dhakhtarka ilkaha

Haddii aad u baahan tahay daryeel ilko oo degdeg ah, wac **111** ama booqo **111 online**.

Wac 999

Haddii ay ku saabsan tahay xaalad halis ku ah nolosha sida shil gaari oo daran, istar oog ama wadne xanuun.

Ka waran haddii aadan ku hadli karin Af-Ingiriisi?



Adeegyada turjumaadda ayaa laga heli karaa qaar ka mid ah farmashiyeyaasha.

U sheeg farmashiyaha luqadda aad ku hadasho, waxaa laga yaabaa inay ku caawiyaan.

NHS

Daawooyin bilaash ah oo loogu talagalay xaaladaha caafimaad ee caamka ah

Ma u qalantaa inaad ka hesho daawooyin bilaash ah farmashiyaha deegaankaaga?



Haddii dakhligaaga uu hooseeyo, waxaa laga yaabaa inaad ka hesho daawooyin bilaash ah farmashi qayb ka ah barnaamijka, oo loogu talagalay xaaladaha caafimaad ee caamka ah.



Barnaamijka daawooyinka bilaashka ah (ama Barnaamijka Daawooyinka Is-daryeelka) wuxuu ka caawiyaa dadka inay maareeyaan xaaladaha caafimaad ee maalinlaha ah iyaga oo isticmaalaya farmashiyaha deegaanka, isla markaana laga yaabo ineysan u baahan booqashada Dhakhtarka Guud (GP).

U hel daawooyin bilaash ah xaaladaha qaar sida:

- Fangaska cagta
- Dhabar xanuunka
- Calool-fadhi (kuwa ka weyn 12 sano)
- Xasaasiyadda maqaarka
- Shubanka
- Dheefshiid xumo
- Xanuunka dhegta
- Qandho/madax xanuun
- Baabasiirka
- Xasaasiyadda hawada iyo xasaasiyadaha kale
- Injirta madaxa
- Dhaawacyo fudud
- Cuncunka xafaayadda
- Fangaska maqaarka
- Cuncunka maqaarka
- Ilkaha soo baxaya
- Gooryaanka xiidmaha
- Caabuqa xubinta taranka dumarka
- Burooyinka maqaarka

Xaaladaha qaarkood, adeeggan waxaa laga yaabaa inuu ku koobnaado saddex la-talin muddo saddex bilood gudahood ah.

Yaa heli kara daawooyin bilaash ah?

Waxaad heli kartaa daawooyin bilaash ah haddii aad ku nooshahay Barnet, Camden, Enfield, Haringey ama Islington, uu dakhligaagu hooseeyo, isla markaana aad ka mid tahay kooxahan soo socda:

- ✓ Dadka qaata Universal Credit ee u qalma warqadaha daawo bilaashka ah
- ✓ Dadka qaata ceyraha taasoo ka dhigeysa inay u istaahilaan helidda daawooyin bilaash ah, sida:
 - ✓ Barnaamijka Dhakhli Yaridda ee NHS oo leh shahaado HC2 oo ansax ah
 - ✓ Taageerada Dhakhliga ama Shaqaaleysiinta iyo Ceyrta Caawimaada oo ku saleysan dakhli
 - ✓ Ceyrta Shaqo-raadiyaha oo ku saleysan dakhli
 - ✓ Shahaadada ka-dhaaftaanka T
 - ✓ ax Credit Pension Credit-ka (la isku hubo)
- ✓ Dadka hoy la'aanta ah ee heysta warqad ka timid maamulka deegaanka
- ✓ Dhallinyarada da'doodu tahay 16–18 jir oo ku jira waxbarasho todobaadkii, waxbarasho waqti yar, ama tababar la aqoonsan yahay
- ✓ Carruurta da'doodu ka yar tahay 16 jir oo leh waalid u qalma adeeggan

! **Fadlan ogow in ka-dhaaftaanka lacagaha daawada aysan si toos ah kaaga dhigayn inaad u qalanto ka faa'ideysiga barnaamijkan, ilaa aad sidoo kale ka mid tahay mid ka mid ah noocyada dadka ee kor ku xusan.**